

Codso Sanduuqa Daryeelka Deegaanka ee Seattle

Xafiiska Joogteynta & Deegaanka Seattle (OSE) wuxuu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in Sanduuqa Daryeelka Deegaanka uu **hadda aqbalayo [codsiyada](#) ilaa Juun 3!**

Sanduuqa Daryeelka Deegaanka (EJ) waxaa la aasaasay 2018 iyada oo qayb ka ah Ajendaha Sinnaanta & Deegaanka ee Magaalada Seattle si loo maalgeliyo mashaariicda ay bulshadu hoggaaminayso ee horumarinta caddaaladda cimilada. Sanduuqa EJ waxaa loogu talagalay in lagu ilaaliyo oo lagu xoojiyo bulshooyinka Seattle oo ay ugu horreyso uguna xumaato Isbedelka Cimilada, cimilada aadka u daran, iyo sinnaan la'aanta deegaanka - oo ay ku jiraan Madowga, Asaliga, Dadka laga tirada badan yahay (BIPOC), muhaajiriinta, qaxootiga, dhalinyarada, odayaasha, iyo deganeyaasha dakhligoodu hooseeyo.

Sannadkan, waxaa jira **saddex ikhtiyaar oo maalgelin ah** oo la heli karo:

- Doorashada 1: waxay bixisaa deeqo u dhexeeya \$10,000 ilaa \$40,000
- Doorashada 2: waxay bixisaa deeqo u dhexeeya \$40,001 ilaa \$90,000
- Doorashada 3: waxay bixisaa deeqo u dhexeeya \$10,000 ilaa \$90,000 mashaariicda ay hogaaminayaan una adeega bulshooyinka **Duwamish Valley**

Qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka, ururada aan faa'iido doonka ahayn, iyo bulshada iyo kooxaha xaafadaha ayaa xaq u leh maalgelin. Mashruucyada waa in ay hogaamiyaan oo si toos ah uga faa'iideystaan bulshooyinka ay saameeyeen arrimaha deegaanka. Mashaariicda xaq u leh waxaa ka mid noqon kara:

- Fanka iyo sheeko-wadaagga
- Waxbarashada bulshada
- Dhisidda awooda bulshada iyo abaabulka
- Isbedelka Cimilada iyo adkeysiga
- Qorshaynta bulshada iyo aragtida,
- Dhisidda xirfadaha iyo tababarrada la xiriira shaqooyinka cagaaran

Haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato Sanduuqan, ka doodista fikradda mashruuca, ama soo gudbinta soo jeedin, waxaanu aad kuugu dhiirigelinaynaa inaad qaado tillaabooyinka soo socda:

- La kulan La-taliye Farsamo **ka hor** intaadan gudbin codsiga. Adeegani waa bilaash waxaana lagu codsan karaa [buuxinta foomkan](#) ugu dambayn May 15.
- Ka qaybgal kulanka macluumaadka farsamada:
 - Jimcaha, Abriil 11, laga bilaabo 12 - 1:15 galabnimo
 - [Isku diwaangeli fadhiga ugu horreeya ee Zoom](#)
 - Isniin, Abriil 28, laga bilaabo 6 - 7:15 galabnimo
 - [Isku diwaangeli fadhiga labaad ee Zoom](#)

Si aad u codsato tarjumaad ama caawin kale oo loogu talagalay kulannada macluumaadka, fadlan iimayl u dir equityenviro@seattle.gov ugu yaraan hal toddobaad ka hor fadhiga aad qorshaynayso inaad ka qaybgasho. Waxaan sidoo kale diyaar u nahay inaan kaaga jawaabno su'aalaha iimayl ahaan.